Warqadda xogta adeegyada ilaalinta dadka Waaweyn

Sharaxaadda barnaamijka Janaayo 2005

Adult protective services (barnaamijka ilaalinta dadka waaweyn) waa hawlo wax qabasho oo lagu badbaadinayo wanaagga iyo daryeelka guud ee dadka waaweyn ee u baahan ilaalinta. Waxaa wax loo qaanayaa dadka waaweyn ee jira 18 iyo ka weyn oo aan naftooda ilaalin Karin oo u baahan in laga caawiyo wax ka qabashada arrimaha xad gudubka, dayaca iyo dhibaataynta.

Adult protective services (barnaamijka ilaalinta dadka waaweyn) dadka uga shaqeeya arrimaha bulshadu waxay baaraan akhbaarta waxayna fuliyaan adeegyo ay ku ilaalinayaan dadka waaweyn, **haddii ay ogolaadaan**, oo dhex deggan bulshada, dadka waaweyn ee degan xarumaha ay sharciyeeyeen barnaamijyada arrimaha bulshada ama dhaqan celinta, iyo dadka waaweyn, iyo waayeelka deggan xarumaha waayeelka lagu hayo iyo xarumaha kale ee ay sharciyeysay Waaxda Waayeelnimada ee Kansas, haddii uusan eedaysanuhu ahayn mid deggan ama ka shaqeeya xarunta ama dadka degan ama shaqaalaha isbitaalka ama xarunta daryeelka waqtiga fog ama xirfadleyaasha xarun daryeel oo ka sharciyeysan Kansas Waaxdeeda Caafimaadka iyo Degaanka. Hay'adaha caafiaadka guriga waxaa mas'uul ka ah Waaxda Caafimaadka iyo Degaanka ee Kansas inay baarto haddii uusan shaqaaluhu u adeegeynin macaamiisha HCBS. APS waxay baaraysaa adeegayaasha u shaqeeya macaamiisha HCBS. Taageero degdeg ah, mas'uuliyad iyo ilaalin ayaa iyaguna diyaar ah.

Ujeedada Barnaamijka Ilaalinta dadka Waaweyn waa in la dhawro dadka waaweyn ee u nugul wax yeellada ayadaoo la badbaadinayo xuquuqdooda bai aadamnimo.

Qeexitaano

Qof Weyn: Dadka jira 18 ama ka weyn oo lagu maleynayo inaanany ilaalin Karin danahooda oo loo geysto ama loogu hanjabo waxyeello ama ficil ah ama ficil la'aan ah oo uu qof kale u geysto ama ay naftooda u geystaan.

Xad Gudub: Ficil walba ama ficil la'aanta kas loogu sameeyo ama naxariis darro sababta ama sababi karta dhibaato sida: dhaawac jirka ama maskaxeed, xad gudub galmo, isticmaalka qalabka iyo kiimikada wax lagu xanibo oo xad dhaaf ah, takoorid, dawooyinka, dabeecadda bah dilka ama hanjabaadda leh, ku xad gudubka mas'uuliyadeed ama diiditaan ama ka hor joogsi waxyaabaha lama huraanka u ah in qofka laga ilaaliyo in jirkiisa ama maskaxdiisa dhib gaarto ama jirro.

Dayac: Ka baaqsashada ama inuu qofku gabo ama daryeeluhu ama qof kaleba, helitaanka adeegyada iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah in la ilaaliyo badbaadada iyo bed-qabka si qofka looga baajiyo dhib ama xanuun jirka ama maskaxda ka gaara.

Tacaddi: in si xun loo isticmaalo hantida qofka weyn ayadoo khalad looga faa'iideysanayo qofka weyn xoogiisa ama lacagtiisa.

Qayr Mas'uulnimo: Waxay dhacdaa markii qofka masuulka ah, ama lagu aaminay qof weyn uu sirta ka bixiyo, ama lacagtooda u isticmaalo ujeedo aan waafaqsanayn sharciga loogu aaminay qofka weyn.

Tusaalaha Dakhliga: Maya

Yaa soo sheegaya?:

Sharciga Kansas (K.S.A. 39-1431) wuxuu dhigayaa in dadka hoos ku qoran ay ugu soo sheegaan shakiga xad gudubka, dayaca, tacaddiga ama qayru mas'uulnimada si degdeg ah Adeegada Bulshada iyo Dhaqan celinta ama Ciidanka Ammaanka.

- Qof kasta oo sharci u haysta inuu ku shaqeeyo cilmiga daweynta
- Cilmi nafsi yaqaanka sharciyeysan
- Cilmi nafsi yaqaanka heerka Masterka ee sharciyeysan
- Caafimaadka cilmi nafsiga qofka yaqaan ee sharciyeysan
- Sarkaalka u sareeya maamulka xarun caafimaad
- Macalinka
- Shaqaalaha bulshada ee sharciyeysn
- Kalkaalisada sharciyeysan ee xirfadda leh
- Kalkaalisada ku shaqaysa ee sharciyaysan
- Dhaqtar ilkood sharciyeysan
- Qofka u sharciyeysan hawlaha guurka iyo qoyska
- Qofka u sharciyeysan daweynta hawlaha guurka iyo qoyska
- La taliye xirfad leh oo sharciyeysan
- La taliye caafimaad oo xirfad leh oo sharciyeysan
- La taliye sharciyeysan oo qaabilsan khamriga iyo si xun u adeegsiga daroogada
- Sarkaalka ammaan sugidda
- Qoyka kiiska maamula
- Mas'uulka ama ilaaliyaha
- Sarkaalka bangiga ama saraakiisha kale ee xarumaha dhaqaalaha
- La taliyaha dhaqan celinta
- Qofka haysta saxiixa mas'uulnimada (power of attorney)
- Wakiilka Sharciga ah
- Qofka bixiya caawimada dowladda
- Mulkiilaha ama maamulaha xarun daryeel oo la degan yahay

- La taliyaha madaxa bannaan ee nolosha
- Sarkaalka maamulka u sarreeya ee guriga qoyska qofka weyn
- Sarkaalka maamulka u sarreeya ee hay'ad sharciyaysan ee caafimaadka auriga
- Sarkaalka Maamulka u sarreeya ee adeeg arrimaha bulshada iyo kuwa la hal maala oo ay maareeyaan ama maal geliyaan waaxda bulshada iyo dhaqan celinta ama ku sharciyeysan K.S.A. 7503307b iyo wixii laga baddalay.

Waa dambi heerka B haddii uu dadkay waajib tahay inay soo sheegaan ay soo sheegi waayaan hadday ka shakiyaan in qof weyn oo dagan la dayacayo, lagu xad gudbayo, ama lagu tacaddiyayo.

Qof kasta oo kale ee ka shakiya ama aaminsan xad gdub, dayac, ama tacaddi wuu soo sheegi karaa.

Dhawritaanka War sheegaha

Dadka soo sheega, ka qayb gala hawl daba gal ah, ama ka marqaati fura hawl maamul ama maxkamadeed warbixinta daraadeed, waa laga dhowrayaa dacwo shacab ama dambi haddii qofka warka soo sheegay uusan warbixin khaldan keenin. Sharcigu wuu mamnuucayaa in qofka shaqaalaha ah ay madaxdiisu ku ciqaabaan warbixintiisa ama ka qayb galka baaritaanka.

Sirta war sheegaha

Magaca qofka warka sheegay ama qofkii lagu sheegay war bixinta lama faafin doono ayadoo aan qofka warka soo sheegay laga haynin qoraal fasax ah ama aysan maxkamad amrin.

Sida loo soo sheego

Soo wac hay'adda Bulshada iyo Dhaqan Celinta (SRS) ama wac APS toll-free ga gobolka khadkiisa ah 1800-922-5330. War shhegeyaasha ka soo wacaya gobolka banaankiisa waa in ay soo wacaan 1-785-296-0044, oo ay dalbadaan in lagu soo celiyo haddaysan rabin inay bixiyaan kharashka wicitaanka. Khadkan waa laga shaqeeyaa 24ka saac maalin walba, todobada maalmoodba. Sharcigu wuxuu kaloo dhigayaa in war bixinta loo gudbiyo ciidanka ammaanka haddii xafiiska SRS uu xiran yahay. Ciidanka ammaanku waa inay u soo gudbiyaan SRS warbixinta iyo faahfaahinta kale maalinta la shaqeynayo ee u horeysa ee SRS ay furan tahay.

Maxaa la soo sheegaa

Magaca iyo cinwaanka qofka la sheegayo in lagu xad gudbay, la dayacay, lagu tacaddiyay ama lagu takri falay; Magaca war bixiyaha, iyo sida loola xariiri karo,

wixii war ah oo qofka warka sheegaya uu aaminsan yahay in loo adeegsan karo baaritaanka iyo dhowritaanka qofka la soo sheegay ee dhibbanaha ah. Waxaa tan ka mid ah: cinwaanka tooska ah, telefoonada iyo tilmaamaha guryaha qaraabada, daryeelayaasha, dambiilaha la tuhmayo, iyo cidii kale. Waxii halis ku ah dhibbanaha ama adeegaha bulshada.

War bixin ku saabsan nooca iyo heerka xad gudubka, dayaca, tacaddiga ama qayrul mas'uulnimada, sida waxa uu arkay war sheeguhu, sababta warsheegugu u maleeyay in ay tahay xad gudub, dayac, tacaddi ama qayrul mas'uulnimo, iyo inuu war sheeguhu aaminsan yahay in dhibbanaha la sheegay uu halis degdeg ah ku jiro.

U Soo sheeg Shakiga Xad Gudubka, Dayaca, Tacaddiga ama Qayrul Mas'uulnimada SRS Haddii:

- Qofka weyn uu ku jiro xaalad halis ah ama ama khatar u yahay in la dhibaateeyo.
- Uusan qofka weyn is difaaaci Karin
- Ay jirto xaalad ama dhacdooyin muujinaya Xad gudub, dayac ama tacaddi.
- Qofka weyn uusan heli Karin adeegyada daruuriga u ah inuu hubiyo badbaadada iyo caafimaadka oo uu iska ilaaliyo dhib ama jirro jirka ah ama maskaxda ah.

Maxay APS Qabanaysaa Marka Warbixintu Soo Gaarto

- In la diyaariyo qof booqda qofka weyn 24 saac ilaa shan maalmood oo la shaqaynayo ayadoo la eegayo halista uu khatarta ugu jiro qofku.
- Hadduu qofka weyni aqbalo in la waraysto qofka dambiilaha lagu sheegay haddii la magacaabay.
- In la waraysto dadka ku shuqul leh: (adeegeyaasha, qaraabada iyo deriska)
- La tashiga qofka weyn, mas'uulka, ilaaliyaha ama/iyo daryeelaha wixii ficil ah ee loo baahan yahay oo **haddii qofka weynu aqbalo,** in la sameeyo qorshe shaqo ama qorshe lagu hagaajinayo si looga hor tago dhibaato kale.

- Haddii qofka weyni aqbalo, in la helo adeegyo ka caawiya sii wadidda caafimaadka jirka iyo maskaxda oo ah: adeegyada sharciga, daryeel caafimaad, qaab nololeed munaasab ah, caawimo nadaafadda qofka, cunto, dhar, hoy si fiican loo kululeeyay ama loo layriyay, xumayn laga ilaaliyo, iyo gaadiid.
- In loo sameeyo dood lagu hubinayo ilaalinta xuquuqda shakhsiga.

- Haysmo khasab ah (oo ah mas’uul ama ilaaliye) waxa la hir gelinayaa kaliya haddii qofka weyn uusan is ilaalin karinayadoo ay ugu wacan tahay curyaanimo maskaxda ama jirka ah oo weyn oo xal kale aan loo hayn.
- Adeegyada la qabanayo waxa ka mid ah kuwa la go’aamiyo in loo baahan yahay si loo ilaaliyo qofka weyn qaabka ugu xanibaadda yar.
- Marka hawshu fusho, qor magacyada dambiilayaasha la xaqiijiyey ee xad gudubka, dayaca, tacaddiga, ama qayrul mas’uulnimada diiwaanka dhexe ee ay haystaan hay’adaha u adeega dadka waaweyn ee jira 18 iyo ka badan.

Diiwaanka gobolladoo dhan ee dambiileyaasha la xaqiijiyay ee xad gudubka dadka waaweyn, dayaca, tacaddiga, ama qayrul mas’uulnimada:

SRS waxay haysaa diiwaan gobolada oo dhan oo sheegaya, marka nidaamka la raaco, dadka ku lug leh arrimo xaqiiq ah oo xad gudub, dayac, tacaddi, ama qayrul mas’uulnimo dad waaweyn. Sharcigan wuxuu u ogolaanayaa shirkad/hay’ad kasta oo u adeegta dadka waaweyn ee jira 18 iyo ka weyn, in ay soo gudbiyaan baaritaan diiwaanka ee shaqaalohooda, iskaa wax u qabsatadooda, iyo dadka kale ee ku lug leh hay’adahooda. SRS waa inay haysaa Fasaxa Akhbaarta oo la saxiixay inta aan la samaynin dalabka baaritaanka diiwaanka.